



Adeegga Xiriirka Bulshada ee Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka

Xoojinta Bulshooyinka

In si Wadajir ah loo Caddeeyo loogana Xalliyo Isku-dhaca

Adeegga Xiriirka Bulshada ee Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka (CRS) waxay ka caawisaa bulshada degaanka inay xalliyaan isku-dhaca ayagoo isticmaalaya Barnaamijka Ogaashada Dhibaataada iyo Isla Xallinteeda ee loo soo gaabiyo (City-SPIRIT.) Barnaamijka waxuu ka caawiyaa bulshooyinka deegaanka inay wax ka qabtaan xiisadda iyo isku-dhac la xiriira arrimaha jinsiyadda, midabka, asalka, jinsiga, lab iyo dhedig ahaanta, diinta, ama naafanimada.

City-SPIRIT waa barnaamij hal maalin soconayo ee isku keena madaxda dowladda hoose, nabad sugidda, kooxaha diiniga, kooxaha xuquuqda aadanaha, ururrada bulshada, kooxaha dhaliyarada, iyo kuwa kale si loo ogaado waxna looga qabto arrimaha muhiimka ah ee saameynaya bulshooyinka. Barnaamijka waxaa howlwadeenna ka ah CRS iyo tabarrucayaal deegaanka deggan waxuuna caawiyaa bulshada deegaanka si ay u horumariyaan xal wax looga qabto dhibaatooyinka deegaanka.

Sabatee ayay magaalooyinka iyo bulshada u tixgelinayaan City-SPIRIT? ▼

Waxay badisaa fahanka iyo xiriirka u dhaxeeya hormuudka si ay u xaliyaan isku dhaca dadkooda

Waxay fursad siisaa in codka hormuudka bulshada lagu daro arrinta

Waxay caawisaa dadaallada isku imaatinka bulshada in si wada jira loo xalliyo dhibaataada

Waxay fududeysaa in go'aan loo dhanyahay lagu sameeyo loona hirgeliyo qorshe xal doon ah

Barnaamijyada & Adeegyada ▼



1. Grarashada Arrinta. Kaqeybgalayaasha waxay iskula shaqeeyaan koox-koox si ay u ogaadaan arrimaha waxeyleynayo dadkooda, ay kamid tahay waxa shaqeynaya iyo waxii la badalayo.

2. Kala Horumarinta Arrinta. Arrimaha lagu ogaaday kooxaha yar-yar, kaqeybgalayaasha waxay tixgelinta koowaad siiyaan arrimaha muhimadda hore u leh ee dadkooda.

3. Xallin Sameyn. Ka qeyb galayaasha waxay horumariyaan xal lagu ogaado arrimaha tixgelinta hore leh. Waxey ka hadlaan saameynta macquul ka ah iyo natiijada xal walba ka soo bixi karo.

4. Gudiga SPIRIT. Gudiga SPIRIT ee hormuudka bulshada ah ee loo doortay hirgelinta xalka ayaa lagu dhisay barnaamijka City-SPIRIT.

5. Warbixinta iyo Wadahadalka SPIRIT.

CRS waxay isku dartaa jawaab celinta iyo macluumaadka laga soo aruuriyay barnaamijka si loo soo saaro warbixin. Kadib CRS waxay qabataa wadahadalka gudiga SPIRIT so dib loogu eego warbixinta iyo loo horumariyo loona howgeliyo tallaabooyin wax looga qabto arrimaha sababaya iskudhaca ee looga hadlay barnaamijka.

Waa Ayo CRS ▼

Waxaa lagu aasaasay sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waa "Nabadoonka Mareykanka" u ah bulshada soo wajahday xiisado ama isku-dhac ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. Ujeedka adeegyada CRS waa inay kor uqaado awooda bulshada ay si gooni ah iyo wadajir ah uga hortagaan una xaliyaan iskudhac mustaqbalka ayadoo la isticmaalayo sida xalinta dhibaataada, aqoon kordhin, iyo ka shaqeynta xiriirka.

Adeeyada iyo Barnaamijyada CRS ▼

CRS waxay siisaa bulshooyinka la kulmo xiisad, barnaamijyo gogoldhig u ah fahanka, hagaajinta wadashaqeynta, iyo kahortagga iska hor imaad mustaqbalka. Shaqaalaha CRS waa xirfadlayaal dhexdhexaadiyaal, tababarayaal, iyo la taliyayaal khibrad u leh isku keenka xubnaha bulshada si ay u hagaajiyaan awoodooda xalinta iskudhac jiro iyo ka hortagaan iskudhac mustaqbalka ah.

Xagee ka Shaqeynaa ▼

Xarunta CRS 📍

Washington, DC

Xafiisyada Gobolada CRS 📍

New England

Boston, MA

Waqooyi-bari

New York, NY

Atlantiga-Dhexe

Philadelphia, PA

Konfur-bari

Atlanta, GA

Galbeedka-dhexe

Chicago, IL

Konfur-galbeed

Dallas, TX

Dexda

Kansas City, MO

Buuraleyda

Denver, CO

Galbeedka

Los Angeles, CA

Waqooyi-galbeed

Seattle, WA


Xafiisyada CRS ee Goobaha Shaqada 📍

Miami, FL

Houston, TX

Detroit, MI

San Francisco, CA



Naga hel, nagala xiriir ▼

www.justice.gov/crs



facebook.com/DOJCRS/



[@DOJ_CRS](https://twitter.com/DOJ_CRS)



askcrs@usdoj.gov



202.305.2935

Macluumaad barnaamijkan ee dheeri ah ama adeegyada kale ee CRS, fadlan la xiriir xafiiska CRS ee magaaladaada.

<https://www.justice.gov/crs/about-crs/regional-and-field-offices>